# XAASHIDA XAQIIQDA # 9

## SABOOLNIMADA LA XIRIIRTA GURYAHA IYO HOY LA' AANTA

Sidee dadka midab kala sooca ahi ugu liidan yihiin guryaha iyo hoy la'aantA?

**Guryo aan ku filnayn:** In ka badan boqolkiiba 50 dadka qoysaska midabka leh ee Kanada waxay ku nool yihiin guryo aan la awoodi karin (taasoo horseedaysa hoy la'aan) oo aan ku filneyn (waxay u baahanyihiin hagaajin iyo dayactir) aan ku habooneyn. (buuq badan, iyo arrimo kale). Tani waxay isbarbar dhig ku tahay boqolkiiba 28 Qoysaska aan ku saleysneyn.

Guryo la awoodi karo looma dhisaayo dadka midabka leh iyo kuwa soogalootiga cusub ee leh qoys weyn – marka laga hadlaayo qeybinta aagagga ee hadda ay wiiqeen sharciga gobalka ee daciifka ah

**Wakiilo Sare:**
Goobaha aasaasiga ah ee loogu talagalay soogalootiga iyo qaxootiga, xarumaha magaalooyinka waaweyn ee Ontaariyo ayaa sidoo kale ah guryo loo doorbido Bulshooyinka midabka leh – oo si aad ah loogu matelay guryaha tayada liita.

**Qarashka Guryaha:**
Hal daraasad ayaa lagu ogaaday socdaalayaasha badankood waxay ku kharash gareeyeen in ka badan boqolkiiba 50 dakhligooda guryah iyodo boqolkiiba 15 ay ku kharash gareeyeen boqolkiiba 75 ama in ka badan dakhligooda soo gala guryaha ayaay ku bixiyaan.

**Takoorid:**
Marka lagu daro xaaladaha xun ee guryaha, dadka asaliga ah, dadka midabka leh iyo soogalootiga waxay la kulmaan takoor ku salaysan isha dakhliga taariikhda amaahda, helitaanka dammaanad qaadayaasha iyo tixraac, aqoonsiga isirka xaalada socdaalka, jinsiga iyo da'da.

**Soogalootiga:**
Daraasad dhawaan la sameyey ayaa lagu ogaaday in boqolkiiba 80 soogalootiga ay ku noolyihiin guryaha girada ah. Haweenka soogalootiga ah waxay helis sare ugu jiraan nabadgelyo dorrida, boqolkiiba 50 waalidiinta socdaalka ah ee dhawaan yimid ee cidi haysan waxay ku jiraan baahi guriyeed.

**Qaxootiga:** In ka badan kalabar qaxootiga iyo magangelyo-doonka waxay joogeen hoyga meel ku gaarka ah mar marka qaarkood, taasoo tilmaamaysa in kooxdani ay khatar sare ugu jiraan hoy la'aan.

**Diirad Gelinta dadka asaliga ah:**
Sanadkii 2011ka qiimeyn federal ah oo lagu sameeyay guryaha ummadda koowaad ayaa la sheegay in boqolkiiba 41.5 guryaha kayd ka ah ay u bahan yihiin dayactir weyn, marka la barbar dhigo kaliya 7 boqolkiiba qoysaska aan asaliga ahayn. wasakh,cayayaan,biyo wasakhaysan,kulayl yari waa qaar ka mid ah arrimahan..

Sanadkii 2016kii Toronto Star wuxu soo wariyey in Attawapiskat ummadda koowaad ee gobalka Ontaariyo ay ku nool yihiin qiyaastii 2100 lakiin ay deggan yihiin 340 guri oo kaliya. Taas micna-heedu waa in ka badan hal qoys ay kuwada nool yihiin hal guri. Guryaha qaarkood waxay gaaraan 13 qof.

Boqolkiiba 28-34 dadka hoyga ku meel gaarka ah waa dadka asaliga ah. Dadka asaliga ah ayaa si aad ah loogu hadal hayaa tirade dadka hoy la'aanta ah ee ku nool xurumaha maga-alooyinka ee Kanada.
Sida lagu sheegay warbixin qaran ayaa soo sheegay dadka asaliga ah ayaa laba jibaar ka badan sidii la filayey boqolkiiba 18 in ay la kul-maan hoy la'aan qarsoon sida dhiggooda asalka ah boqolkiiba 8.

**Hoy la'aan qarsoon:**
waxaa lagu qeexay inay yihiin "dadka si ku meel gaar ah ula noolaado kuwa kale laakiin aan la-hayn damaano qaad degenaasho ama rajooyin degdeg ah, ama helitaan guri rasmi ah". Tani waxay sharaxeysaa la jooga qaraabada, asx-aabta deriska ama shisheeyaha sababtoo ah ma haystaan ikhtiyaar kale.
Kujirka daryeelka, ama guri la'aanta asal ahaan,ma lihid tixraac, milkiilayaasha taas ma jecla. Ma haysto kirada bisha ugu dambeysa iyo kirada bisha koowaad, ma jecla taas. Midda labaad waa midabkeyga, milkiilayaasha qaarkood ma jecla taas. Waxaan u tagay haweeneydaan oo waxay tiri ayadu dhibaato ayaan ku Qabaa dadka madawga ah.

**"Laanqeyrta Cas" ee Kanada:**
Kooxaha cunsuriga ah ayaa badanaa ku qasbay in ay aqbalaan guryo aan ammaan ahayn, caafi-maad qabin, hoos iyo gudaha, xaafadaha leh dambiyada sarreeyo iyo dakhli dhaxdhaxaad hooseeyo.

**Guri La'aanta Qarsoon:**
Intaa waxaa dheer kuwa muuqda ee hoyga la', 450,000-900,000 oo reer Kanada ah ayaa matala hoy la'aanta qarsoon.

**Jinsiyad:**
Saboolnimada iyo "midabka dadka laga tira badan yahay" ayaa ah qodobada ugu muhiimsan ee horseedi kara hoy la'aan. Dadka isir raaca ah waxay la kulmaan heerar sare oo guryo la'aan ah iyo guryo xumo. Soogalootiga iyo qaxootiga Ontaariyo waxay khatar ugu jiraan hoy la'aan saboolnimo darteed, takoorid, jarista barnaami-jyada bulshada, la'aanta adeegyada guryaha, iyo macluumaad la'aanta xaqquuqda.

## Qoraal Degdeg Ah?

Markaan tixraacno dadka midabka leh waxaan u hadalnaa dadka reer Kanada ee asal ahaan aan yurub ka soo jeedin ama dhaxalka – labadaba dadka midabka leh ee u dhashay Kanada iyo sidoo kale kuwa ku dhashay meel kale.

Markaan tixraacno dadka asaliga ah, waxaan u hadalnaa shaqsiyaadka ummada koowaad, Inuit iyo Metis. Magaalada Toronto, boqolkiiba 62 dad ku nool saboolnimada waxay ka soo jeedaan kooxo isir raac ah.
Boqolkiiba 52 dadka midab takoorka Kanada ee ku nool saboolnimada waxay degan yihiin Ontaariyo. Reeraha hoos taga Kanada dikhligeeda hooseeyo (LICO) ama cabirka (LIM), waxay ku bixiyaan boqolkiiba inta aad u badan dakhligooda daruuriga aasaasiga ah sida cuntada iyo hoyga marka loo eego qoyska caadiga ah, sidan ayaanu u cabbirnaa saboolnimada.

Midab-kala sooca habbeysan ayaa badanaa keena eexasho hay'ad qarsoon oo ku saabsan siyaasada, dhaqannada iyo habraacaya mud-naanta u leh ama u faa'iido darro noqon kara kooxa dad ah. Waxay noqon kartaa natiijada ka soo baxda sida wax loo sameeyo had iyo jeer ayadoo aan la tixgelinaynin sida aay ku saameeyaan koox gaar ah si ka duwan sidii hore.

Sanadkii 2017, celceliska kirada Ontaariyo oo ah hal qol jiif waxay ahayd $994. Mushaarka saacaddi looga baahan yahay.Kirada si loo awoodi karo waxay noqonaysaa $19 saacadi.

Celceliska kirada magaalada Toronto oo ah hal qol jiif ah waxay ahayd $1132 sanadki 2016. Mushaar saacadeedka looga baahan yahay ki-radaan si loo awoodo (boqolkiiba 30 dakhliga ama ka yar ayaa ahaan lahaa $27.7.

Xitaa ka dib marka la kordhiyey musharka ugu yar ,guryuhu waxay ahaan doonaan kuwo aan la awoodi doonin kuwa sameeya wax ka yar $19 saacadi.

Dib-u-habeeynta ay so bandhigtay dawladda Ontaariyo bishi Maay 2017kii ay ku baaqday in mushaarka ugu yar loo kordhiyo $15 saacaddiiba Janaayo 2019.

Hergelinta kororkaan ayaa muhiim u ah caawinta jaaliyadaha isir raaca ah siday u awoodi lahaayeen.

## Maxaa la Qabtay?

**Zhaawnong Gamik, Nishnawbe Homes** waxay siisaa dad badan oo kali kali asali ah oo u yimaada Toronto waxbarasho ama fursad shaqo. Nishnawbe Homes waxay bixisaa guryo la awoodi karo oo iyaga ku xira bulshada waxayna ka turjumayaan dhaqanka ummadda koowaad.

nishnawbehomes@rogers.com

**UDoodista Xaruunta Kiraystayaasha Ontaariyo (OCTO)** waxay u shaqeysaa horumarinta xaquuqul insaanka iyo cadaalada hoyga ee dadka reer Ontaariyo ee dakhligooda hooseeyo iyadoo loo maraya talo sharci iyo wakiilnimo, dib-u-habaynta sharciga, abaabulka bulshada, tababarka iyo waxbarashada.
www.acto.ca